

Xarumaha Wax soo saarka:

Istaraatiijiyadaha Muhiimka ah ee Shaqaalaha looga Ilaalinayo Infekshinka COVID-19

Nooca la heli karo: <https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/community/guidance-manufacturing-workers-employers.html>

Loo-shaqeeyayaashu waa inay ka baaraan goobta shaqadooda waxyaabaha kordhin kara halista faafinta COVID-19. Hormari qorshaha caafimaadka iyo badbaadada iyada oo la isticmaalayo usu geynta tallooyinka ka hortaga xiggo. Si jooqta ah ula xiriir [saraakiisha](#) caafimaadka bulshada [iyo/ama](#) deegaanka iyo badbaadada shaqada iyo xirfadlayaasha caafimaad inay helaan warbixin la xiriirto oo cusub ee la xiriirto COVID-19.

- **Shaqaalaha ha kala fogaadaan ugu yaraan 6 fuud ilaa intii macquul ah.**

Adeegso waxyaabo jir ahaan u dhaxeeyo dadka, yaree shaqaalaynta, ama wax ka beddel goobaha shaqada, hab-raacyada shaqada, ama saacadaha iyo wakhtiyada shaqada si aad u kordhiso masaafada u dhaxeysa shaqaalaha. Kordhi goobaha la iska diiwaangeliyo marko la soo geliyo ama laga baxayo shaqada, kala fogee kuraasta qolalka nasashada, oo banaanka ka samee teendhooyinka nasashada.



- **Ku dhiirigeli shaqaalaha buka inay guriga joogaan (oo ay ku jiraan shaqaalaha laga helay cudurka laakiin aan lahayn astaamo).**

Samee siyaasado ku dhiirigeliya shaqaalaha buka inay guriga joogaan iyaga oo aan ka cabsanayn ciqaab ama luminta dhiirigelinada, oona xaqiiji in shaqaaluhu ka warqabaan siyaasadahan. La shaqee xirfadlayaasha daawaynta goobta shaqada si aad u sameyso [siyaasado loogu talagalay shaqaalaha laga yaabo](#) inay halis dheeri ah ugu jiraan COVID-19.



- **Kordhi inta jeer ee la nadiifiyo lagana dilo jeermisyada goobaha la wadaago.**

[Nadiifi iyo jeermisdil aaladaha](#) ama qalabyada kale ugu yaraan [mar kasta oo shaqaalaha ay ku kala wareegayaan goobaha shaqada](#). Jeermiska ka-dil sagxadaha badanaa la taabto ee ku yaalo goobaha shaqada iyo qolalka nasashada dhammaadka shaqo-wareeg kasta. Nadiifi kana dil jeermiska basaska hor iyo gadaal loo raaco ama basaska yarar haddii la isticmaalayo.



- **Ku dhiirigeli shaqaalaha inay ku dhaqmaan kala fogaanshaha dadka (ka fogaanshaha dadka kale ugu yaraan 6 fuud).**

Habee wakhtiyada biririfta iyo xilliyada kala-wareega shaqada. Dhig xusuusin halka ay shaqaaluhu isugu imaan karaan, oo ay ku jiraan aagagga shaqada, aaggaga nasashada, qolalka kabadhka, hoolalka ama dariiqyada, iyo aaggaga laga soo galo iyo kuwa laga baxo. Ku dhiirigeli shaqaalaha inay ka fogaadaan wadaaga baabuurta markay imaanayaan iyo markay ka baxayaan shaqada, haddii ay suurtagal tahay.

- **Ka baar shaqaalaha astaamaha COVID-19 ee suuragalka ah ka hor inta aysan soo galin goobta shaqada.**

Hab-raacyada baaritaanka kala tasho saraakiisha caafimaadka ee gobolka iyo deegaanka iyo xirfadlayaasha daaweynta goobta shaqada. U dir guriga shaqaalaha leh astaamaha islamarkaaba, ku dhiirigeli inay guriga isku-takooraan, oona sii macluumaad ku saabsan goorta ay shaqada ku soo noqon karaan.

- **Sare u qaad nadaafad gacmaha ku haboon . Sii helitaanka biyo socdo, saabuun, shukumaanka warqada, iyo gasacadaha qashinka (ha taaban gasacadaha qashinka haddii la heli karo).**

Shaqaalaha ha dhaqdaan gacmaha ugu yaraan 20 ilbiriqsi. Kordhi tirada goobaha gacmo-nadiifiyayaasha (kuwaa aan taabashada u baahnayn halkii ay suurogal tahay). Keen gacmo-nadiifiye aalkolo ku salaysan oo ugu yaraan ka kooban 60% aalkolo.



- **Sii shaqaalaha maro lagu daboolo wajiga iyo gaashaanada wajiga.**

Xaqiiji in daboolada wajiga si sax ah loo xirto (si raaxo leh oona daboolayso sanko iyo afka). Sii shaqaalaha daboolada wajiga oo la dhaqi karo oo leh lakabyo badan oo dhar ka sameysan. Beddel marka ay qoyaan, wasakh noqdaan, ama sumoobaan. Nadiifi gaashaamada wajiga ka dib shaqo-wareeg kasta haddii la isticmaalay. Xaqiiji in gaashaamada wajigu ay dhaafayaan garka kuna duub dhinacyada wajiga.



- **Bar oo tababar ka sii shaqaalaha COVID-19 iyo sida looga ilaaliyo naftooda iyo dadka kale ee jooga guriga iyo goobta shaqada.**

Dabool mowduucyada sida [guri joogida markaad xanuunsantahay](#), ka fogaanshaha bulshada, sida loo xirto [daboolada wajiga dhar](#), iyo nadaafada [gacmaha ku haboon](#). Ku bixi agabyada qaabka ugu fudud ee la fahmi karo iyo luqadaha ku haboon. CDC [waxay leedahay waraago daabacan](#) oo la soo dejiisan karo.



- **Sii shaqaalaha qalabka ilaalinta shaqsiyeed (PPE) ee loogu baahan yahay howlaha shaqada.**

Ha ku beddelin daboolada wajiga PPE-yada lagu taliyay ama loo baahan yahay sida qalabka lagu xirto sanko iyo afka ee neefsiga ama maaskarooyinka dhakhaatiirta. Xaqiiji in PPE-yada si sax ah loo isticmaalo. Ku tababar shaqaalaha sida loo xirto ama loo bixiyo PPE-yada iyada oo aan la sumaynin.

- **Abuur qorshe hawl gal oo loogu talagalay xaaladaha degdega ah.**

U diyaargarow maqnaanshooyin badan. Qorshee sida aad sii wadan karto howlahaaga ganacsi ee daruuriga ah iyada oo la dhimayo shaqaalaha. Ka tababar shaqaalaha dhinac badan si ay u gutaan waajibaadyada muhiimka ah.



[cdc.gov/coronavirus](https://www.cdc.gov/coronavirus)